Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa — Daraasad Kooban No.1

Barakaca, Amni darrada iyo Maamulka Xeryaha Barakacayaasha Baydhabo

(Maarso 2019) Daraasaddan waxa ay soo koobeysaa natiijooyinkii ugu muhiimsanaa ee mashruuca cilmibaarista ee Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa ee la sameeyay intii u dhexeysay 2017-2019. Mashruuca Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa oo ay maalgeliyeen DFID iyo ESRC waxa uu diiradda saarayay aragtiyada iyo khibradaha dadka barakacay oo deegaan ka dhigtay afarta magaalo ee Baydhabo, Boosaaso, Hargeysa iyo Muqdisho. Afartan magaalo waxa ay hoos tagaan maamullo siyaasadeed oo kala duwan, laakiin waxa ay wadaagaan dabeecado guud. Marka koowaad, waa magaalooyin si xowli ah u koraya dhanka cabbirka iyo cufnaanta, midda labaad, oo ah mid kamid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee keenay kobocan, waa isu guurguur xooggan oo gudaha dalka ah oo ay sababtay barakac khasab ah. Inkastoo waxyaabo badan oo la xiriira xaaladda dhaqaale iyo bulsho ee dadka barakacay ay wadaagaan magaalooyinka, waxaa jira kala duwanaan dhinaca khibradda taariikheed ee 'magaaleynta xeryaha barakacayaasha' iyo dadaallada gudaha iyo kuwa caalamiga ah ee lagu maareynayo xeryaha barakacayaasha iyo goobaha kale oo ay degaan barakacayaasha. Qoraalkan kooban waxa uu diiradda saarayaa khibradda barakacayaasha magaaada Baydhabo, oo ah caasimadda maamulka Koonfur Galbeed Soomaaliya.

Sawir qaade: Muumino, Baydhabo - Kaam barakacayaal

Key findings

- Sida loo deggan yahay xeryaha barakacayaasha Baydhabo waxa inta badan ku saleysan tahay qaab qabiil.
- Barakacayaal badan ma helaan adeegyada aasaasiga ah, waxana ay ku tiirsan yihiin gargaar bini'aadamnimo.
- Culeyska waxaa sii kordhiyay iyadoo aanay jirin shaqooyin mushaar lagu qaato, iyo suuqa xoogsatada oo tartan badan uu ka jiro.
- Xeerar haga shaqada iyo shaqaalaha oo aanan jirin (ama sharciyadaas oo aanan la dhaqan gelinin) ayaa ka dhigaya barakacayaasha kuwo u nugul noocyo badan oo xooggooda loogu xadgudbo.
- Dumarka waxa ay dhabarka u ritaan culeyska dhaqaale ee ugu badan ee quudinta qoyska.
- Rabshadaha qoyskana waa mid baahsan.
- Gadashada hantida iyo qiimaha dhulka oo sii kordhaya ayaa saameyn ku leh barakacayaasha, xiriirka ay la leeyihiin horjoogayaasha xeryaha barakacayaasha, iyo noocyada magaaleynta magaalada.

Taariikhda Magaalada

Baydhabo waxa lagu magacaabay 'magaaladii geerida' markii ay isku biirsadeen abaaro iyo dagaallo sokeeye

horraantii 1990-aadkii, abaarahaas iyo dagaalladaas oo ay ku dhinteen kumannaan Soomaali ah. Bartamihii 1990-aadkii, magaalada waxa ay noqotay caasimadda maamul ay dhisteen maleeshiyo beeleed. Inkastoo maamulkan markii hore uu taageero badan helay, waxa ay bilaabeen madaxdii in dhexdooda is dagaalaan horraantii 2000. Sanadihii u dhexeeyay 2007 iyo 2012, magaalada waxaa maamulayay Al Shabaab. Inkastoo ay ka baxeen Baydhabo, maleeshiyada Islaamiyiinta ah waxa ay weli joogaan tuulooyin badan oo ku hareereysan magaalada, waxana ay khatar amni ku yihiin magaalada. Xaaladdan xasaradaha badan iyadoo ay jiraan ayaa Baydhabo waxa soo aaday barakacayaal badan oo kasoo qaxay dagaallo, gaajo iyo harraad, iyo sidoo kale canshuurta badan oo ay Al Shabaab ka qaadaan. Baydhabo hadda waa xarunta siyaasadda ee maamulka Koonfur Galbeed, oo ah maamul goboleed katirsan Dowladda Federaalka Soomaaliya. Amniga magaalada wuu soo hagaagay sanadihii ugu dambeeyay, dhaqaalaha magaaladana wuu kobcayaa. Kobacan dhaqaale oo ay weheliso kaalmada bini'aadamnimo oo sii korortay, waxa ka dhashay in barakacayaal badan yimaadaan magaalada si ay u helaan nabad, caawinaad, iyo fursado dhaqaale. Sawirada satellite-ka ee hoose waxa ay muujinayaan fiditaanka magaalada sanadihii u dhexeeyay 2004 (kor) iyo 2018 (hoos). Inkastoo ay jiraan xeryo barakacayaal oo ku yaalla dhammaan duleedyada magaalada, waxaa jiray koror ku yimid deegaannada barakacayaasha u dhaw gegida diyaaradaha iyo duleedka waqooyi.



Koboca magaalada Baydhabo 2004/2018 (Google Earth)

Qaabka cilmibaarista loo sameeyay iyo dadka ka qeyb qaatay

Guud ahaan, 2017/2018 cilmibaarayaasha Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa waxa ay wareysteen 120 qofood oo rag iyo dumar isugu jira, intooda badanna ahaa dad barakacayaal ah oo ay da'doodu iyo qabiilladoodu kala duwan yihiin kuna kala nool afarta magaalo. Ilaa 40 qofood oo barakacayaal ah (10 qofood magaalo kasta) ayaa loo qeybiyay kaamirooyin ay u isticmaaleen in ay ku qaadaan sawirro ka turjumaya nolosha maalinlaha ah. Sawirrada ku lifaaqan qoraalkan kooban waxaa qaaday dadkaas barakacayaal ah. Sida ay khariiradda muujineyso, dadka lagu wareystay Baydhabo waxa ay intooda badan kasoo barakeceen deegaannada baadiyaha ah ee gobollada Bay iyo Bakool. Mid kamid ah dadka la wareystay ayaa kasoo laabtay xerada qaxootiga Dadaab ee ku taalla Kenya. Dadka la wareystay waxa ay yimaadeen Baydhabo inta u dhexeyso 1 bil ilaa 7 sano kahor inta aanan wareysiga la qaadin. Balse tirada ugu badan ee barakacayaal ah waxa ay yimaadeen magaalada inta u dhexeyso 8 bilood ilaa 2 sano kahor. Qaar badan oo kamid ah dadka aan wareysannay horey ayay u barakeceen.



Khariidad: Peter Chonka

Natiijooyinka cilmibaarista

Qaar badan oo kamid ah barakacayaasha ma helaan adeegyada aasaasiga ah sida guryo, biyo, nadaafad, daryeel caafimaad iyo waxbarasho. Dadka la wareystay waxa ay ku celceliyeen halganka ay ugu jiraan helitaanka biyo, nadaafad xumo, iyo ku noolaanta goobo wasakh badan. Dugsiyada Qur'aanka waxa ay ku yaallaan dhul furan, dad badanna xitaa ma awoodaan in ay caruurtooda u diraan dugsiyada Qur'aanka. Shaqaaleynta caruurta waa mid baahsan,

gabdhahana inta badan waxa ay daryeelaan caruurta yaryar.

Dad badan waxa ay ku tiirsan yihiin gargaar bini'aadamnimo. Qulqulka gargaarka waxa uu noqday muhiim, laakiin joogto ma aha, layskumana halleyn karo balse waxaa ku tiirsan nolosha dad badan. Dadka xerooyinka barakaca ayay u guurguuraan si ay kaarka cuntada ama lacag u helaan. Xogta barakacayaasha waa mid aanan nidaamsaneyn, mararka qaarna waxaa suuragal ah in gargaar bini'aadamnimo joogsado iyadoo aanan dadka la wargelinin. Dhaqanka ah in la dhisto 'buush bariis' waa mid laga yaqaanno Baydhabo: waana in dadka deggan magaalada ay heshiis la galaan horjoogayaasha xeryaha barakacayaasha si ay buush uga dhex dhistaan oo ay ku helaan kaalmo bini'aadamnimo iyagoo aanan goobta ku nooleyn.

Culeysyada dhaqaale, fursado shaqo iyo xeerar shaqo oo aanan jirin ayay ku celceliyeen dadkii laga wareystay dhammaan magaalooyinka oo ay ku jirto Baydhabo. Barakacayaasha waxa ay qeyb muhiim ah ka yihiin shaqaalaha magaalooyinka sida xowliga ah u koraya sida Baydhabo. Dhammaan dadka la wareystay waxa ay ku tiirsanaayeen shaqooyin hal-abuur kooban ama xoogsi: dumarka inta badan waxa ay aadaan guryaha la deggan yahay si ay shaqo uga helaan sida dhar-dhaqis, nadiifin ama shaqaale guri. Ragga (iyo mararka qaar dumarka) waxa ay ku shaqeystaan xamaalinimo ama waxa ay ku dadaalaan in ay ka shaqeeyaan mid kamid ah goobaha dhismayaashu ka socdaan ee magaalada. Laakiin sida uu sheegay mid kamid ah dadkii la wareystay: "shaqaalaha waa ay badan yihiin, waa sidii arigii oo kale oo coos ay daaqaan raadsanaya". Tartanka loogu jiro shaqada wuu sarreeyaa, dadkana waxa ay u baahan yihiin xiriir in ay la leeyihiin dadka loo shaqeeyo. Xoogsatada waxa ay wajahaan noocyo kala duwan oo xadgudub shaqo ah. Dumarka waxa ay la kulmaan dhibaateyn marka ay guryaha ka shaqeynayaan, qaar badan oo kamid ahna waxaa dib looga dhigay ama laga inkiray lacagtii ay shaqeysteen. Ragga waxa ay ka shaqeeyaan dhismayaasha iyagoo aanan raacin xeerar bad-qab. Haddii ay ku dhaawacmaan shaqada, dawo iyo magdhaw midna ma helaan. Sidoo kale, inkastoo xeerar shaqo ay jiri karaan, waxaa yar hay'ado u qalabeysan ama doonaya in ay taageeraan dadka haddii xuquuqdooda shaqo lagu xadgudbo.

Si loo kabo dakhliga yar oo ay kasoo helaan shaqada magaalada, barakacayaal badan ee ku nool Baydhabo waxa ay xiriir dhaw la leeyihiin tuulooyinka u dhaw magaalada oo ay markii hore kasoo barakeceen. Inkasto dadka intooda badan ay kusoo barakeceen magaalada sababo la xiriira canshuur badan oo ay Al Shabaab dul dhigeen, dadka qaar waxa ay aadaan kanasoo laabtaan tuulooyinka oo ay beero ku leeyihiin. Barakacayaal badan ee ku nool Baydhabo waxa ay beero yaryar ku leeyihiin xerooyinka ku yaalla duleedka magaalada ama waxa ay ka shaqeeyaan beero ay dadka kale leeyihiin.

Barakaca waxa ay uu kala duwan u saameyaa ragga iyo dumarka. Dumarka waxa ay inta badan dhabarka u ritaan culeyska dhaqaale ee quudinta caruurta. Waxa ay shaqeeyaan wakhti badan si ay u helaan lacag yar, waxana u wehliya masuuliyadda dheeraadka ah ee daryeelka caruurta, biyo aroorka, iyo shaqada guriya. Ragga intooda badan ma awoodaan in ay qoyska quudiyaan. Rag badan ayaa sidoo kale ku wareersan sidii ay ula qabsan lahaayeen nolosha magaalada. Jirrada iyo daalka maskaxeed ee ragga waxa ay noqotay mid lala qabsaday. Xasaradaha qoysaska waa mid ku baahsan xeryaha barakacayaasha.

Sawir qaade: Timiro, Baydhabo – biyo aroor

Arrinta ugu muhiimsan dhammaan dadka la wareystay waa hantida, gaar ahaan xeerarka dhulka, guryeynta iyo dejinta xeryaha barakacayaasha. Dadka laga wareystay Baydhabo waxa ay qireen shaqada adag oo ay hayaan horjoogayaasha xeryaha barakacayaasha: tusaale ahaan, taageeradoodii hore oo ay ku caawiyeen in ay buush dhistaan, dadaalkooda in ay xerada nadiif ka dhigaan, iyo dhexdhexaadinta dadka is dagaala. Horjoogayaasha xeryaha barakacayaasha waxa ay ku dadaalaan in ay soo jiitaan indhaha gargaarka caalamiga ah. Haddii gargaarka la helo, horjoogayaasha waxa ay leeyihiin saami, waana qaab ay NGO-yada u arkaan in lagu leexinayo kaalmadii.

Qiimaha dhulka iyo hantida magaalada Baydhabo sare ayay u kacayaan, waana calaamad muujineyso horumarka magaalada. Qiimaha dhulka waxa uu dhibaato ku yahay barakacayaasha – maadaama ay ka dhalan karto in dhulka ay deggan yihiin laga saaro, barakacayaal badanna dhulkii xoog ayaa looga saaray iyagoo aanan la siinin digniin ku filan, welibana si rabshad wadato.

Isbarbar dhig iyo laga bartay goobaha kale ee cilmibaarista laga sameeyay

Muqdisho waxa ay taariikh fog oo welina sii socota u lahayd barakac baahsan tan iyo sanadihii 2000, ka saaridda xeryaha barakacayaashana waxa ay si gaar ah u ahayd mid xooggan. Barakacayaasha waxaa loo sikiyay duleedka magaalada, waxana ay qeexeen sida ay kaalin muuqata uga qaateen in dhulku horumaro qiimana yeesho, sida ka nadiifinta geedaha, ka dhisidda cooshado, iyo soo jiidashada ganacsiga. Dugsiyada Qur'aanka iyo masaajidyo ayaa kadib laga furaa, adeegyo koronto, iyo biyo ayaana la geeyaa. Markasta oo xeryaha barakacayaasha ku xermaan magaalada waa markasta ee uu qiimaha dhulku sare u koco taasoo ka dhigta barakacayaasha kuwo u nugul in xoog looga saaro dhulkii ay degganaayeen. Maadaama magaalada Baydhado fideyso, waxaa jira khatar lamid ah tan Muqdisho iyo in dhulka xoog looga saaro barakacayaasha ay sii xoogeysan doonto mustaqbalka.

Dib-u-dejinta barakacayaasha Boosaaso iyo Hargeysa waxa ay ka badbaadiyeen barakacayaasha in dhulka laga saaro taasoo ku baahsan Muqdisho, waxana ku abuurmay xaafado cusub oo laga dhisay duleedka magaalooyinkaas. Waxaa jiro qorshayaal lamid ah dib-u-dejinta Boosaaso. Qorshayaalkan laga fuliyay Hargeysa iyo Boosaaso waxaa si weyn usoo dhaweeyay dadkii dib-u-dejinta loo sameeyay, in milkiyad dhul ku helayaan qorshaha waxa uu qaar kamid ah barakacayaasha siiyay dareen amni. Balse qorshayaasha noocaasi ah ma ahayn kuwo faa'ido u wada ah dhammaan barakacayaasha. Tusaale ahaan, in guryaha laga dhiso goobo ka fog magaalada waxa ay u badan tahay in ay ugasii dari doonto kala sooca bulsho ee u dhexeysa dadka deggan magaalada iyo barakacayaasha Boosaaso, halka Hargeysa aanay lahayn gaadiid iyo jidad isku xera xaafadaha cusub iyo magaalada taasoo dadka dib-u-dejinta loo sameeyay ka goyneyso suuqa shaqada ee magaalada. Guryaha cusub ee Boosaaso waxa ay xarun dhaqaale u noqdeen dadka ka faa'ideystay qorshaha helista milkiyadda dhulka, waxa ayna sidoo kale soo jiidanayaan indhaha barakacayaal cusub oo aanan horey uga faa'ideysanin qorshaha dhul bixinta. Dadka aanan lagu darin qorshaha lahaanshaha dhulka waxa ay wajahayaan khataro lamid ah in xoog looga saaro dhulka ay ku nool yihiin. Marar badan waxaa dhacda in guryo aanan rasmi loo deganaan doonin la siiyo iyadoo aanan si buuxda loola tashanin dadka la dejinayo. Guryahan intooda badan waa kuwo aanan raaxo lagu dareemeynin kana dhisan jiingado. Intaa waxaa dheer, adeegyada qaar oo loogu talo galay dadka cusub sida waxbarashada waxa soo baxday in aanay ku habbooneyn, maqnaanshaha caruurta ee iskuulladana aad ayuu u sarreeyaa. Qorsheynta wakhtiga fog ee magaalada iyo gargaarka bini'aadamnimo waxa uu u baahan yahay in arrimahan lagu xalliyo si loo xaqiijiyo in si dhab ah barakacayaasha nugul uga faa'ideystaa

Natiijooyinka cilmibaaristan waxaa loo jeediyay maamullada dowladaha hoose, hay'adaha gargaarka caalamiga ah, bulshada rayidka iyo ka qeyb qaatayaasha cilmibaarista ee afarta magaalo iyadoo bandhig sawirro iyo doodo la sameeyay bishii Janaayo ee sanadka 2019. Faafaahin buuxdo ee mashruuca iyo bandhigyada waxa aad ka heli kartaa halkan: http://securityonthemove.co.uk/events/ Bandhigyo lamid ah waxaa lagu qabtay Oslo (Febraayo 28), London (Maarso 14), iyo Nayroobi (Abriil). Haddii aad qabto su'aal la xiriirta cilmibaarista fadlan la xiriir Jutta.bakonyi@durham.ac.uk ; peter.chonka@kcl.ac.uk ; manedle100@gmail.com ama kirsti.stuvoy@nmbu.no

[Warbixintan waxaa turjumay Tayo Translations]